

Duufaanaada qabowga iyo qabowga ba'an



Intaanu duufaanku iman, gacanta ku hayso bustayaal bada oo hubi in xubin kasta gurigiinu haysto jaakeet diiran, gacan-gelis, koofiyad diiran , iyo kabo biyaha celin kara.



Muddada duufaanka, dibedda iska ilaali. Haddii karto, xidho dhawr dhar oo khafiifa - kaas ayaa ka dugsoon jaakeetka geliya ee culus.



Dabool afkaaga si aad sanbabka ugu dhawrto hawada qabow iyo wasakhda.

Iska ilaali ku socdaalka baabuur duufaanka dhexdiisa, laakiin **haddii ay dhacdo:**

- Waa inaad ku qaadato baabuurkaaga xidhmada isu-diyaarinta xaalada degdega.
- Bansiinta baabuurku ha kuu buuxdo.
- U sheeg qof meeshaad tagayso, marayso iyo wakhtiga aad ku began tahay.



Haddii aad ku go'doonto baabuur dhexdii...


- Baabuurka ag joog. Ha isku dayin inaad lugayso si aad u badbaado.
- Ku xidh anteenaha mar mid leh oo dhalaalaysa (gaar ahaan guduud) si badbaadiyayaashu kuu arkaan.

-Kici baabuurka oo shid kulaylisada 10 daqiiqa saacad kasta.



-Dariishad inyar fur (ka fog dabaysha) si hawada u soo gasho.

-Shid nalka kore markuu baabuurka shidan yahay si lagu arki karo.



-Inta aad fadhido, dhaqdhaqaaqi gacmaha iyo lugaha si dhiig u furfurmo oo u wareego oo aad u diirtid.



Haddii aad barafka gurayso duufaanka kadib, taxadir oo ha isdaalin. Hawsha culusi wakhtiga qaboobaha wadnaha ayey daalisaa.

Xusuuso: haddii aad dibedda u baxdo duufaanka dhexdiisa, iska dul xidho dhar khafiifa oo dhawr ah. Iyaga ayaa ka diiran jaakeet culus.



Public Health
Prevent, Promote, Protect
Fargo Cass Public Health

Text from "Are You Prepared?" by the Cass (ND) and Clay (MN) Emergency Planning Partnerships. Created with funding provided by Fargo Cass Public Health through the Cities Readiness Initiative (CRI) Adapted by Healthy Roads Media (www.healthyroadsmedia.org)